

# QEYBAHA DHULKA IYO GOBOLADA NORWAY



Waxaa Norway ka jira shan qeybood oo dhul ah. Waqooyiga fog waxaa ku yaala Waqooyiga Norway. Bartahama wadanka waxaa ku yaala Trøndelag. Galbeedka waxaa ku yaala Gobolada galbeed, barigana waxaa ku yaala gobolada bari. Qeypta dhulka ee ku taala xagga fog ee jihada bariga, waxaa lagu magacaaba Dhulka koonfur.

Qeyb dhuleed kasta waxaa loo qeybiyaa gobolo. Norway waxaa ku yaala 11 gobol.

## Waqooyiga Norway

Waqooyiga Norway waxa uu ku yaalaa waqooyiga ugu fog, oo sida dhabta ahna sidoo kale waa bariga ugu fog Norway.

Gobolkani waxa uu ka koobtan yahay labo gobol oo kala ah Tromso iyo Finnmark iyo Norland.

Haddii aad timaadid waqooyiga Norway inta lagu gudo jiro bilaha diseembar iyo janaayo, waxa aad la kulmi kartaa waqtiga mugdi ah. Wuxaan haysanaa waqtiga mugdiga ah marka ay qoraxdu afar iyo labaatanka saac ka hooseesayso dhulka inta ay ishu qaban karto. Waqooyiga Norway qofku waxa uu arki karaa iftiinka waqooyi xiliga jiilaalka.



Iftiinka waqooyi. Foto: Pxhere.com

Waqooyiga Norway waxa uu qofku xilliga xagaaga la kulmi karaa qorax habeen bar.

## Landsdeler og fylker i Norge - somali

Qorax habeen bar waa marka ay qorraxdu dhacayn, oo qeyb ka mid ah saxankii qoraxda laga arki karo dhulka inta isha qaban karto afar iyo labaatanka saac.

### Troms iyo Finnmark

Troms iyo Finnmark waxa ay ku yaaliin bariga iyo waqooyiga ugu fog, oo waxa ay xad la leeyihii Ruushka, Finland iyo Iswiidhan. Tromsø waa magaalada ugu weyn Troms iyo Finnmark. Barta ugu waqooyisan Norway, Knivskjellodden, Wuxa ay ku taal Troms iyo Finnmark. Nordkapp ayaa aad u caan ah taas oo ku taal waqooyiga fog sida ay u fog tahay Knivskjelloden. Nordkapp waa goob loo dalxiis tago oo caan ka ah Norway.




Nordkapp Foto: Andrey Armyagov, Adobestock

Hammerfest oo ah magaalada ku taal waqooyiga ugu fog adduunka waxa ay ku taal Troms iyo Finnmark.

### Nordland

Norland waa gobol dheer oo dhuuban kaas oo xuduud la leh Iswiidhan. Bodø waa magaalada ugu weyn Nordland.



*Kalluun la qalajiyey oo ka soo laalaada iskafaalo..  
Tixraac: Wasaarada ganacsiga iyo kaluumaysiga*

Lofoten waxa ay ku taalaa Norland, waxayna ka kooban tahay jasiirado fara badan. Laga bilaabo janaayo ilaa abriil waxaa Lofoten ka dhaca kalluumaysiga Lofoten. Inta lagu guda jiro kalluumaysiga Lofoten waxaa la soo dabtaa in badan oo ah kalluunka yuumbiga. Yuumbiga waxa uu ku nool waqooyiga fog ee badweynta Barent. Laga bilaabo janaayo ilaa abriil kalluunka yuumbigu waxaa uu dabaal ku tagaa Lofoten si uu ukun u dhigo. In badan oo ka mid ah yuumbiga waa la qallajiyyaa. Kalluunka la qallajiyey waxaa lagu macagaabaa kalluun qalalan. Kalluunka qalalan badankiisa waxaa loo dhoofiyyaa wadammada kale, tusaale ahaan Talyaaniga iyo Nayjeeriya.

Goobada cirifka waqooyi waxa ay dhexmartaa Nordland. Waqooyiga

goobada cirifka waqooyi waxaa ka jira xilli mugdi ah iyo qorax taagan habeen barkii. Markasta oo u qofka uu u sii fogaado jihad waqooyi, maalmihii ayaa badanaya oo ay la socdaan qorrax taagan habeen barkii iyo xilli mugdi. Nordkapp waxa ay leedahay xilli mugdi ah laga bilaabo 20ka Nofeembar ilaa 22ka Janaayo, waxa kale oo ay leedahay xilli ay qoraxdu taagan tahay habeen barkii laga bilaabo 14ka maajo ilaa 29 luuliyo.

## Trøndelag

Trøndelag waxa ay ku taal bartamaha waddanka, waxa ay tahay qeyb dhul iyo gobol. Qeyb dhuleedkan waxaa kale oo lagu magacaabaa Bartamaha Norway. Trøndelag waxa ay leedahay laagooyin dhaadheer iyo buuro dhaadheer. Laagta ugu dheer waa Trondheimsfjorden. Trollhetta waa buurta ugu dheer. Trøndelag waxa ay xad la leedahay Iswiidhan.

Magaalada ugu weyn gobolka Trøndelag waa Trondheim. Trondheim waa magaalada saddexaad ee ugu wayn Norway. Nidarosdomen waa kaniisada ugu weyn Trøndelag. Kaniisada waxaa lagu duldhisay qabriga Olav-kii Quduuska ahaa. Kaas oo ahaa boqorkii Fiking. Wuxuu noolaa ku dhowaad sannadku markuu ahaa 1000. Waxa uu tegay wadamo kale

oo Yurub ku yaalaa oo uu ka soo maqlay wax ku saabsan diinta masiixiga. Waxa uu go'aansaday in diinta masiixigu ay ahaato diinta kaliya ee laga ogolyahay Norway. Nidarosdomen waxa ay ku taalaa Trondheim.



Nidarosdomen Kilde: Pixabay.com

Røros waa magaalo ku taal gobolka Trøndelag. Røros waxa ay ku taal dusha sare ee buuraha Røros. Magaaladan waxaa halkaa looga sameeyey sababta oo ah waxa ay goobta buurta ka heleen maar sanadkii 1644. Waxaa la sameeyey meelo laga qodo maarta. Dadku waxa ay u guureen Røros si ay uga shaqeeyaan godadka laga qodo maarta. Sidaas ayey ku kortay magaalada Røros.



Røros Foto: Lars Geithe, Flickr

## Dhulka bariga

Dhulka bariga waa qeybta waddanka ugu gobolada badan. Gobolada ku yaalaa dhulka bariga waa Oslo, Vestfold iyo Telemark, Viken iyo Innlandet. Dhulka bariga waa qeybta wadanka Norway ugu dadka badan oo ay degan yihiin in ka badan 2,5 milyan oo qof. Taas macnaheedu waa in ku dhowaad kala bar dadka Norway ay degan yihiin dhulka bariga.

Glomma waa wabiga ugu dheer Norway. Wabigu dhereriisu waa 619 Kilometer waxa uuna durduraa laga bilaabo Trøndelag oo ku taala waqooyiga ilaa koonfurta dhulka bariga, waxa uuna ku dhamaadaa magaalada Fredriksstad.



Glomma waa uu ku dhamaadaa Fredrikstad. Kilde: Wikipedia

Buuraha ugu dhaadheer Norway waxa ay ku yaaliin dhulka bariga. Galdhøpiggen waa buurta ugu dheer Norway. Buurta dhererkeedu waa 2469 mitir. Taas macnaheedu waa in oogada Galdhøpiggen ay 2469 mitir ay ka sareyso badweynta.



Galdhøpiggen. Kilde:Wikimedia Commons



1Mjøsa. Kilde: Wikipedia

## Oslo

Oslo waa magaalo madaxda Norway iyo magaalada ugu wayn Norway. Oslo waa gobol gaar ah waxa uuna ku yaalaa gudaha laagta Oslo. Qasriga

## Landsdeler og fylker i Norge - somali

boqortooyada, Baarlamaanka iyo  
dowladda waxa ay ku yaaliin Oslo.



Baarlamaanka Foto: Sergii Figurmyi, Adobestock

Vestfold iyo Telemark  
Gobolka Vestfold iyo Telemark waxa uu ku  
fidsan yahay laga soo bilaabo xeebta iyo  
ilaa kor buurta dheer.

Buurta ugu dheer Vestfold iyo Telemark  
waa Gaustadtopen. Gaustadtopen waxa  
ay ku taal Rjukan oo waxa ay 1883 mitir  
ka sareysaa badweynta.



Gaustadtopen. Hoosta dooxada waxaan aragnaa  
magaalada Rjukan. Foto: Eystein M. Andersen,  
Riksantikvaren, Flickr

Farrisvannet waxa ay ku taal gobolka  
Vestfold iyo Telemark. Farrisvannet waxa  
ay magaceeda siisay biyaha macdanta  
Farris. Laakiin biyaha Farris kama imaan  
Farrisvannet, laakiin waxa ay ka soo

burgadaan ilo biyood hoosta uga yaala  
gunta keymaha ku yaala Bøkeskogen  
kuwaas oo halkaa ka agdhow.



Bøkeskogen i Larvik Foto: Jostein, Adobestock

Tønsberg waxa ay ku taal Vestfold iyo  
Telemark oo waxa ay tahay magaalada  
Norway ugu da'da weyn. Magaalada  
waxaa la aasaasay ku dhowaad sanadkii  
870. Slottsfjellet waxa ay ku taalaa  
Tønsberg, waana magaalada ay ku taal  
qalcada burbursan ee ugu wayn  
Waqooyiga Yurub.



Slottsfjellet i Tønsberg Foto: Celine, Adobestock

Viken  
Viken waa gobolka ugu dadka badan  
Norway. Gobolku waxa uu xad la leeyahay  
Iswiidhan. Gobolka Viken waxa uu ku  
fidsan yahay laga bilaabo laagta Oslo ilaa

buurta, laga bilaabo xadka Iswiidhan ilaa  
bartamaha Koonfurta Norway.

Magaalooyinka ugu waaweyni waa  
Drammen, Lillestrøm iyo Fredrikstad.

### Dhulka dhexe

Dhulka dhexe waa gobolka kaliya ee  
lahayn xeeb. Gobolku waxa uu xad la  
wadaaga Isiiwdhan. Balliga ugu wayn  
Norway waa Mjøsa. Mjøsa waxa ay ku  
taal gobolka dhulka dhexe. Mjøsa waxa ay  
caan ku tahay Skibladner. Skibladner waa  
markabka Norway ugu da'da weyn ee wali  
shaqeynaya. Skibladner waxa uu  
dhexdooda u kala shiraacdaa Eidsvoll,  
Hamar, Lillehammer iyo Gjøvik.



*Skibladner er et dampskip. Foto: Mahlum, Riksantikvaren*

### Dhulka koonfurta

Dhulka koonfurta waxaa kaliya ku yaala  
hal gobol, waana Agder. Dhulka koonfurta  
waxaa uu leeyahay koox jasiirado isku  
dhow oo leh ilo, jasiirado iyo meelo badan  
oo lagu qubeysto.



*Skjærgård Kilde: Flickr.com*

Magaalada ugu weyn dhulka koonfurta  
waa Krisitiansand. Beerta xayawaanka ugu  
weyn Norway waxa ay ku taal  
Krisitiansand, waxaana lagu magaacaabaa  
beerta xayawaanka Kristiansand, laakiin  
dadku badanaa waxa ay kaliya ugu  
yeeraan beerta xayawaanka.



*Xayawaan daanyeerada u eg oo jooga beerta  
xayawaanka Kristiansand. Foto: Kommunal – og -  
moderniseringsdepartementet*

### Dhulka galbeedka

Gobolada ku yaal dhulka galbeedka waxaa  
lagu magaacaabaa Møre iyo Romsdal,  
Vestland iyo Rogaland. Dhulka galbeedka  
Norway waxa ay adduunka caan kaga  
tahay laagaha dhaadheer iyo buuraha  
dhaadheer. Laagta ugu dheer Norway ,

Sognefjorden waxa ay ku taal galbeedka Norway. Dhererkeedu waa 204 kiilomitir.



Balestrand waxa ay ku taal agagaarka Sognefjorden  
Foto: mariusltu, AdobeStock

Ku dhowaad dhammaan magaaloooyinka ku yaal galbeedka Norway waxa ku teedsan yihiin xeebta. Magaaloooyinka ugu waawayn qeyb dhuleedkan waa Bergen, Stavanger, Ålesund iyo Haugesund.

### Rogaland

Magaalada ugu wayn Rogaland waa Stavanger. Waxaa shidaal laga helay badda waqooyi dhamaadkii lixdamaadkii. Waxaa la go'aansaday in xafiiska ugu wayn warshadda shidaalka laga dhigo Stavanger. Halkas bilowgii waxaa joogay afar qof oo shaqaale ah. Mid ka mid ah waxa uu ka

yimid Ciraaq waxaana lagu magacaabaa Faaruuq Al-qasim.



Saldhig shidaal Foto: Wikipedia

### Dhulka galbeed

Magaalada ugu weyn dhulka galbeed waa Bergen. Bergen waa magaalada labaad ee ugu weyn Norway, badanaa magaalada waxaa lagu magacaaba caasimada galbeedka Norway. Guryaha badda ku ag yaal oo geedaha ka sameysan ayaa ah meel caan ah oo ku taal Bergen.



Bryggen i Bergen Foto: Michelle Maria, Pixabay

Waxaa Norway ku yaalaa wabiyo dhagax adag noqday. Wabiyada dhagaxa ahi waa aag wayn oo ka kooban baraf. Meelaha qaarkood aad ayey u qabow yihiin xilliyada xagaayada marka uusan barafku dhalaalin. Markaas barafkii aad iyo aad ayuu u sii

## Landsdeler og fylker i Norge - somali

badanayaa sanad kasta. Barafkii waxa uu isu bedelayaa baraf adag. Marka aaggaa barafka adkaaday uu noqdo mid weyn oo adag oo ay bilaabato in uu u taraaraxo hoos xagga buurta, taasi waa wabi baraf adag ah.

Jostedalsbreen ayaa ah wabiga barafka adag ee ugu wayn Norway. Jostedalsbreen waxa uu ku yaal gobolka dhulka galbeed.



*Jostedalsbreen Foto: Tania Zbrodko, Adobestock*



Taag waa aag ilaa xad siman kaas oo ku yaala aag buureed. Taagga kama baxaan

geedo, kaliya waxaa ka baxa geedo yar yar.

Hardangervidda ayaa ah taaggaa ugu wayn Norway. Waxa ay ku taal gobolada Vestland, Viken iyo Vestfold iyo Telemark.



*Hardangervidda Foto: By-studio, Adobestock*

Møre iyo Romsdal  
Magaalooyinka ugu waaweyn Møre iyo Romsdal waa Ålesund, Molde iyo Kristiansund.

Biyo dhaca ugu weyn Norway waxa uu ku yaal Møre iyo Romsdal, waxaana lagu magacaabaa Vinnufossen. Biyo dhaca ugu caansan waa Vøringsfossen, waxa uuna ku yaal gobolka dhulka galbeed. Biyo dhacyada ugu dhaadheer Norway malahan biyo badan.

## Landsdeler og fylker i Norge - somali



*Figur 2Vinnufossen. Foto: Carl S Bj, Wikipedia*

Jaranjarta Midsund waxa ay tahay jaranjara  
dhagax ah oo leh 2200 talaabbo.  
Jaranjartaas waxaa dhisay dadka  
Sherbarka ee ka yimid Nepal.



*Jaranjar dhagax ah Foto: Arild, Adobestock*

Landsdeler og fylker i Norge - somali

